REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1027/042012

DATE 07/04/12

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0226/042012

## Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabadgelyada Guud Xeer Lr. 51/2012

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-17/558/2012 ee 02/04/2012 ee Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabadgelyada Guud Xeer Lr. 51/2012;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabadgelyada Guud ee Xeer Lr. 51/2012.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RL: 45
RECEIVED
08/04/2012.

Ref: GW/G/KF-17/558/2012 Date: 02/04/2012

## Ujeeddo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Anshaxa Iyo Nabad-Galyada Guud

## Xeer (No. 51/2012)

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 10aad,21aad,22aad,23aad,24aad,25aad,26aad 27aad, 28aad ,29aad,32aad, 34aad iyo 35aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland |
| MARKUU ARKAY: | Xeerka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer/ Lr.23/2002 |
| MARKUU ARKAY: | Xeerka Nidaamka Guud Xeer/ Lr.14/1963(public order law) |
| MARKUU ARKAY: | Xeerka Xakamaynta Hubka fudud Xeer/ Lr.39/2010 |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 51/2012** ee Golaha Wakiilada u gudbiyeen Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa **12/11/2011** |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 51/2012** ee Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa **15/03/2012** |
| MARKUU ARKAY : | In Golaha Guurtida wax ka bedal iyo kaabis ku samaynin Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabad- Galyada Guud ee Somaliland Xeer **Lr: 51/2012** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu Gudbiyeen . |

Received 03/04/12

# WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Xeer Lr: **51/2012** Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabad- Galyada Guud si uu uga guto waajibaadkiisa Dastuuriga ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Md . C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

GOLAHA WAKIILADA
SOMALILAND

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADA

GOLAHA WAKIILADA
ARKIFIYADA
SOMALILAND




# XEERKA ILAALINTA ANSHAXA
# IYO
# NABAD-GELYADA GUUD

## XEER/ LR.51 /2011

# GOLAHA WAKIILADU

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

Markuu Arkay; Qodobada, 10aad, 21aad, 22aad, 23aad, 24aad, 25aad, 26aad, 27aad 28aad, 29aad, 32aad, 34aad iyo 35aad ee Dastuurka Jamhuuriyada SomaliLand

Markuu Arkay: Xeerka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer/Lr.23/2002

Markuu Arkay: Xeerka Nidaamka Guud, Xeer/ Lr. 14/1963 (Public Order Law)

Markuu Arkay: Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud, Xeer/ Lr.39./2010.

Markuu ku Qancay: In ay lama huraan tahay inla sugo Ammaanka Qaranka, silooga hortago wax kasta oo halis gelin kara xasiloonida iyo Nabad-gelyada dalka.

## WUXUU

## <u>SOO-SAARAY XEERKAN</u>

## CUTUBKA 1AAD

### QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Macnaha Eray-bixinta

Diiwaangelin: Waxaa loola jeedaa diiwaangelinta shirkadaha, ururada guryaha, Meheradaha iwm, ee Xeerkani jideeyey.

Guddi: Waxaa loola jeedaa Guddiga Nabad-gelyada Qaranka.

Xeer: Waxaa loola jeedaa Xeerka ilaalinta anshaxa iyo nabad gelyada guud.

Ruqsad: Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha nooc kasta ah ee ay bixiso Guddiga Nabadgelyadu.

Wasaarad: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Wasiir: Waxaa lool jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

### Qodobka 2aad
### Magaca Xeerka

Magaca Xeerkan wuxuu noqonayaa Xeerka Ilaalinta Anshaxa iyo Nabad-gelyada Guud.

### Qodobka 3aad
### Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka Qaranka iyo Xeerarka kale ee Dalka.

### Qodobka 4aad

## Xadka Addeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland

## Qodobka 5aad
## Xubnaha Guddiyada Nabad-gelyada Qaranka

Xeerkan waxaa lagu dhisayaa Guddiyada Nabad-gelyada oo kala ah:-

**B. Heer Qaran**:

1. Madaxwaynaha JSL
2. Madaxwayne ku-xigeenka JSL
3. Wasiirka W/ Arrimaha Gudaha
4. Wasiirka W/Gaashaandhigga
5. Taliyaha Ciidanka Booliska;
6. Taliyaha Ciidanka Qaranka
7. Taliyaha(Madaxa) Sirdoonka Qaranka

**T. Heer Gobol**:

1. Guddoomiyaha Gobolka
2. Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka ama qaybaha marka ay hal qayb ka badan yihiin
3. Taliyaha Qaybta ee Ciidanka Qaranka
4. Taliyaha Sirdoonka Gobolka.

**J. Heer Degmo:**

1. Duqa Degmada;
2. Taliyaha saldhigga booliska ee degmada ama Taliyayaasha saldhigyada ee degmada;
3. Taliyaha Ciidanka qaranka ee aagga degmada;

Haddii xubin ka mid ah xubnahaas kor ku xusan ay maqnaato, waxaa halkeeda buuxinaya xubinta shaqo ahaan ku xigta xubinta maqnaatay.

## Qodobka 6aad
## Xilka iyo Awoodaha Guddiga Nabad-gelyada Qaranka

1. Xilka iyo awoodaha Guddiga Nabad-gelyada Guud waxay noqonayaan:

    a. Xaqiijinta iyo Sugidda Nabad-gelyada guud iyo xasiloonida Qaranka;
    b. Hubinta fulinta go'aamadda maamul ee lagu dhowrayo ammaanka iyo kala dambaynta dalka ee ka soo baxa M/weynaha, Wasiirka Arrimaha Gudaha ama guddoomiyaha Gobolka iyo qiimaynta wax tarkooda.

2. Guddigu ma laha awood ay xukun ciqaabeed ku soo saarto.

3. Waxaa la tirtiray xeer kasta oo guddiga awood u siinaya inay xukun ciqaab ah qof ku xukumaan, marka ay lagama maarmaan noqoto in la qabto qof lagu tuhmay inuu nabad-gelyada halis ku yahay, waxa ciidamada Boolisku qabashada qofkaas u waydiisanayaan amar qabasho maxkamadda awoodda u leh.

4. Guddiga Nabad-gelyadu, waxay kaloo xoojin karaan in hab dhaqameed lagu xalliyo khilaafaadka bulshada dhexdeeda, marka ay sidaas dhinacyadu codsadaan.

## Qodobka 7aad
## Xoojinta Hawlgallada Ciidanka Booliska

1. Ciidanka Booliska hawlgalladooda dhinaca sugidda nabad-gelyada, waxaa lagu xoojin karaa Ciidanka Qaranka (**Millateriga**) mar kasta oo ay lagama maarmaan noqoto, si ay gacan u siiyaan ilaalinta iyo sugidda nabad-gelyada qaranka.

2. Marka ay lagama maarmaan noqoto in Ciidanka Qaranka (**millateriga**) laga hawlgeliyo dhinaca ilaalinta iyo sugidda amniga gudaha, waxaa waqti sugan sidaa amri Kara guddiga Nabad-gelyada Qaranka ee heer qaran.

3. Cutubyada Ciidanka Qaranka (**Millateriga**) ah ee lagu xoojiyo Ciidanka Booliska si ay uga qayb qaataan sugidda nabad-gelyada gudaha, inta ay ku jiraan hawlgalkaas, waxay lahaanayaan shaqsiyadda iyo awoodaha Ciidanka Booliska.

## Qodobka 8aad
## Xadhiga qof lagu tuhunsan yahay inuu halis ku yahay Nabad-gelyada Qaranka

1. Haddii qof lagu tuhmo inuu lug ku leeyahay falal halis ku ah nabad-gelyada iyo amaanka qaranka waxay guddiga nabadgelyadu, iyagoo u maraya Booliska, ka dalban karaan Maxkamadda Gobolka ee awooda u leh halka uu ku sugan yahay qofku in lagu hayo qofkaas Saldhig Boolis oo aan ka badnayn 48 saacadood si looga hortago khatarta ama halista looga baqay amase baadhis dheer loogu sameeyo fal lagu tuhunsanyahay.

2. Haddii Ciidanka nabadgelyadu u arkaan in qofka la tuhmay uu fal-dembiyeed halis ah geysan karo ama uu baxsan karo ka hor inta aan qabashadiisa amar looga helin Maxkamadda awoodda u leh, waxa Ciidanka nabad-gelyada u bannaan inay qabtaan qofkaas, muddo aan ka badnayn 48 saacadoodna ay Maxkamadda ogolaansho uga helaan sii-hayntiisa.

3. Muddada ugu dheer ee ay Maxkamaddu ogolaan karto haynta qof lagu tuhmay in uu halis ku yahay nabad-gelyadu kama badnaan karto soddon **(30) maalmood.** Haddiise ay lagama maarmaan noqoto in la sii hayo qofkaas, waxaa u bannaan Maxkamadda in ay amarto in la sii hayo **soddon (30)** maalmood oo kale ugu badnaan. Qofkaas waa in si degdeg ah loogu celiyo xorriyaddiisa, haddii aanay muddadaas ku soo bixin fal-dembiyeed lagu eedayn karo.

4. Maxkamadda awoodda u lihi, ka dib marka ay ku qanacdo qoraalka sababaysan ee Ciidanka Booliska, waxay 24 saacadood gudahood ku soo saaraysaa amarka lagu haynayo qofka la tumay.

5. Qof looga shakiyo faldanbiyeed ama abaabul, ama baxsasho in la faro inuu iska soo xaadiriyo saldhiga booliis laba jeer 24 saac ee kasta inta mudada khatarta ama tuhunku jiro.

6. Hadii qofkaas la faray inuu iska xaadiriyo saldhiga police-ka, diido fulinta amarkaas, ama ku iman waayo mudada la faray, waxa lagu ciqaabayaa sadex bilood oo xadhig ah ama ganaax aan ka badnayn 3, 000, 000/= SLSH sida waafaqsan qodobka 505 ee xeerka ciqaabta guud

## Qodobka 9aad

## Awoodaha kale ee Guddiga Nabad-gelyada Qaranka

1. Maxkamadda awoodda u lehi waxay soo saari kartaa, ka dib marka ay hesho codsiga Guddiga Nabad-gelyada ama Ciidanka Booliiska, amar lagu baadhayo, lagu xidhayo goobo cayiman ama lagu joojinayo hawl socota oo wax u dhimaysa nabad-gelyada, kala-dambaynta ama anshaxa amase keeni karta in ay isku dhacaan qaybo bulshada ka mid ah.

2. Maxkamaddu waxay ku amri kartaa in qofka lagu tuhmo in uu nabad-gelyada halis ku yahay, lagu sameeyo dabogal lagu ogonaayo dhaqdhaqaaqiisa si looga hortago halistiisa.

3. Qof kasta oo fulin waaya amar Maxkamadeed oo nabad-gelyada lagu ilaalinayo, waxaa Maxkamaddu ku xukumaysaa xadhig aan ka badnayn saddex bilood oo aanu iibsigu u bannaaneyn, haddii aanay jirin sabab caafimaad oo dhakhtar la aqoonsan yahay caddeeyey.

4. Maxkamadda awoodda u lihi waxay amri kartaa qof loo arkay inuu nabad-gelyada halis ku yahay, in aanu muddo cayiman ka bixin Dalka, magaalada uu joogo ama gurigiisa ugu badnaan 60 maalmood, amase in su'aalo laga weydiiyo baadhis la xidhiidha arrin nabdgelyo.

5. Iyadoon lagu xadgubaynin xeerarka kale ee dhaqan galka ah, kadib marka ay hesho *codsiga* Xafiiska Xeer-ilaalinta guud, Maxkamadu waxay soo saaraysaa amar ay dalka kaga masaafurinayso qof ama dad shisheeye ah oo loo arkay in ay ammaanka halis ku yihiin, xataa qorku ama dadku ha haysto ama haystaan ruqsad joogitaan oo hore loo siiyey.

6. Maxkamadda awoodda u lihi, Ka dib marka ay hesho soo jeedinta Xeer-ilaalinta Guud ama Ciidanka Booliiska waxay soo saareysaa amar sababaysan oo ay muddo cayiman ku joojinayso in uu dalka soo galo qof, koox ama urur loo arkay in uu nabad-gelyada iyo kala dambaynta halis ku yahay, iyadoo saddexdii biloodba mar dib u qiimaynaysa amarkaas, ayna u bannaan tahay in ay

qaaddo xayiraadda, haddii ay sugnaato in ay meesha ka baxday sababtii xayiraada loo saaray qofka, kooxda, ama ururka.

7. Mar kasta codsiyada farqadaha hore ee qodobkan ku xusan, waxay guddiga Nabad-gelyadu u maryaan Xeer-ilaalinta guud.

## CUTUBKA 2AAD

## NIDAAMKA GUUD IYO KALA DAMBAYNTA

### Qodobka 10aad
### Banaan-baxyada

1. Qabanqaabiyeyaasha bannaan-baxyada lagu qabanayo fagaare dadka ka dhexeeya ama u furan dadka oo dhan, waxaa waajib ku ah in ay soo ogeysiiyaan Duqa degmada, Gudoomiyaha Gobolka ama wasiirka Arrimaha Gudaha, ugu yaraan saddex maalmood ka hor, si loogu ogolaado Waxaa bannaan-bax fagaare ah loo tixgelinayaa xataa shir lagu qabanayo meel fagaare ah, haba lahaado mid cid u gaar ahe, iyadoo la eegayo tirada dadka ka soo qayb gelaya, ujeeddada iyo mawduuca.

2. Waxaa loo tixgelinayaa shir gaar ah kuwa ay goobahooda ku qabsadaan ururada siyaasadda iyo ama kuwa aan siyaasiga ahayn iyo axsaabta la aqoonsan yahay xarumahooda, haddii aanay isu rogin qaab shirweyne ama kaambeyn degmo, Gobol ama Qaran.

3. Sababo la xidhiidha caafimaadka guud ,degenaanshaha, dhaqanka wanaagsan, kal-dambaynta iyo nabad-gelyada, waxaa Duqa degmada, Gudoomiyaha Gobolka ama wasiirka Arrimaha guduhu go,aan qoraal ah oo sababaysan ku diidi karaa shir ama isu soo bax guud, amase wuxuu wax ka bedeli karaa qaabka loo qabanayo iyo wakhtiga la qabanayo, isagoo ogeysiin degdeg ah siinaya Guddiga Nabad-gelyada iyo police-ka.

4. Qodobada Xeerkan ee loo adeegsanayo kulanada iyo bannaan-baxyada dadweynaha ayaa sidoo kale loo adeegsanayaa socodka dadweynahu waddooyinka ku maraan ee cabasho lagu muujinayo.

### Qodobka 11aad
### Xafladaha Diiniga ah iyo Tacsiyaha

1. Tallaabooyinka ku xusan qodobka 10aad ee hore waxaa ka reeban, qabashada xafladaha diiniga ah ee ay qabashadooda shareecada islaamku ina fartay iyo kuwa lagu fidinayo diinta iyo isu tagyada tacsiyaha.

2. Shirarka waaweyn ee culumada diinta ee ay suuragalka tahay in meelo kala duwan looga yimaado, waxaa waajib ku ah cidda hogaaminaysaa inay ruqsad weydiisato Guddiga nabad-gelyada si ammaanka loola socdo.

3. Waxa reeban isu imaatin kasta oo diineed oo looga dan leeyahay kicin dadwayne, naqdin ama faafin afkaar diimeed oo ujeedo gaar ah ciddi ka leedahay ama sababi karta iska horimaad.

## Qodobka 12aad
## Reebanaanta Hubka ee Xilliga Bannaan-baxyada.

1. Waxaa reeban in hub, noocuu doono ha ahaadee, loo qaato shirarka iyo fagaareyaasha bannaan-baxyda, xataa haddii qofka sitaa ruqsad u haysto sidashadiisa ama haysashadiisa hubkaas.

2. Hubka lagu qabto isu soo baxa dhexdiisa waxaa la wareegaysa Dawladda, qofka sitana waxaa la ganaaxayaa ilaa **1,000,000/= Sl Sh** si waafaqsan qodobka 539(c) ee xeerka ciqaabta guud.

## Qodobka 13aad
## Kala kaxaynta Banaan-baxyada

1. Bannaan-baxyada dadweynaha waa la kala kaxayn karaa marka ay:

    a. Caddaayo in qabashada shirka ama bannaan-baxa aan loo Marin qaabka ku xusan Qoddobka 10aad ee xeerkan.
    b. Muuqato in bannaan-baxa ama shirku isu bedelo muddaharaad guud oo dhaafa intii loo ruqseeyey, ama uu yeesho rabshado iyo gacan ka-hadal halis gelin Kara nidaamka iyo kala dambaynta guud iyo nabad-gelyada muwaadiniinta.

2. Joojinta iyo kala kaxaynta bannaan-baxyada iyo shirarka dadweynaha waxaa u xil saaran Ciidanka Booliska, ka dib marka ay amar qoraal ah ka helaan guddiga nabad-gelyada qaranka si Xeerka waafaqsan.

## Qodobka 14aad
## Habka Loo Joojinayo Bannaan-baxa

1. Sida ku cad qodobka 13aad, marka ay lagama maarmaan noqoto in la joojiyo isu soo bax (bannaan-bax), waxaa marka hore loo jeedinayaa bannaan-baxayaasha inay joojiyaan isu soo baxa kana dheeraadaan dadku goobaha lagu qabanayo isu soo baxa, iyadoo loo marayo amarka Guddiga Nabad-gelyada degmada, gobolka ama Qaranka, hadba siday tahay.

2. Haddii ay u hogaansami waayaan bannaan-baxayaashu amarka joojinta isu soo baxa, waxaa ciidamada ammaanka amar lagu siinayaa inay xoog ku kala kaxeeyaan iyaga oo adeegsanaya gaaska dadka kaga ilmaysiiya, xabada rabadhka ah, ama biyaha xoog badan.

3. Cid kasta oo amarka joojinta diidana waxaa la horgeynayaa maxkamadda awooddda u leh, waxaana mid kasta lagu xukumayaa ugu yaraan Saddex bilood ugu badnaan lix bilood oo xadhig ah, haddii aanu dhicin dambi kale oo ka culusi.

## CUTUBKA 3AAD

### TALAABOOYINKA LAGAGA HORTAGAYO MASIIBOOYINKA IYO BUR-BURKA

### Qodobka 15aad
### Soo saarista Walxaha Qarxa Ama Sunta ah ee Khatarta ku ah Deganaanshaha Bulshada

1. Iyadoon lagu xadgudbayn Xeerka xakamaynta Hubka fudud (Xeer, Lr.39/2010) iyo mamnuucidda Miinada (Xeer, Lr.40/2009), Ma bannaana samaynta, keydsashada, ka ganacsiga iyo isu gudbinta walxaha qarxa, sumaha ama waxyaabaha khatarta ku ah deganaashaha bulshada, haddii aan Wasiirka Arrimaha Gudaha ogolaansho laga helin.

2. Ogolaanshaha Wasiirku wuxuu ku xidhnaan kara soo jeedinta guddi farsamo oo xilkoodu yahay in ay soo xaddidaan shuruudaha goobaha la dhigayo ama laga soo saarayo walxaha qarxa, sumaha ama waxyaabaha khatarta ku ah nolosha iyo degenaanshaha Bulshada iyo baahida ruqsadda loo siin karo.

### Qodobka 16aad
### Dhoofinta iyo Soo dejinta Walxaha ku Xusan Qodobka 16aad

Haddii aanay ahayn hawlaha ciidamadda qalabka-sida ama arin ganacsi ama dhaqaale qaran, ruqsada kasta oo la xidhiidha dhoofinta iyo soo dejinta walxaha qarxa, sumaha ama waxyaabaha khatarta ku ah nolosha iyo deganaanshaha bulshada waa inay noqotaa bixinteedu mid aad looga taxadiray, waxaana bixinaysa Wasiirka Arrimaha Gudaha isaga oo la tashanaya guddiga nabad-gelyada ee heer qaran,

### Qodobka 17aad
### Baabinta Sumaha Iyo Waxyaabaha kale ee Khatarta ah.

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu, isagoo la tashanaya Wasaaradaha ay khusayso, wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro amar lagu burburinayo ama lagu daadinayo sumaha iyo waxyaabaha kale ee khatarta ku ah nolosha iyo deganaanshaha bulshada ee laga helo Warshadaha , kaydadka ama bakhaarada wax iibiya ee aan ruqsada u haysan.

### Qodobka 18aad

## Qaraxyada Hubka Ardifishalka ah ee Khatarta leh

1. Ma banana in la isticmaalo hubka ardifishalka (Macmalka) ah ee leh dhawaaqa xabadaha ama walxaha qarxa ee dadka argagaxa gelin kara ama dhalin kara qaraxyo dab dhaliya oo gubasho ku keena meelaha la degan yahay ama waddooyinka, haddii aan ruqsad looga haysan Duqa magaalada ama Maxkamad awood u leh.

2. Diidmadaasi saamayn mayso waxyaabaha loo isticmaalo xafladaha qaran iyo munaasabadaha waaweyn ee diiniga ah ee la hubiyey in aanay dhib keenayn.

## Qodobka 19aad
## Dabka la Shido

1. Ma bannaana in dab lagu shido meel ugu yaraan u jirta saddex boqol oo mitir (300m) meelaha lagu kaydiyo ama lagu iibiyo waxyaabaha gubashada u nugul sida, shidaalka ,buulasha ,xoolo daaqeenka, kaymaha iyo guryaha la degan yahay.

2. Haddii baahi darteed cid loogu ogolaado in ay dab shiddo, waa in taxaddar dheeraad ah la muujiyo, isla markaana la diyaariyaa qalabkii iyo dadkii bakhtiin lahaa haddii uu dabku dhaafo xadka loogu talo galay.

## Qodobka 20aad
## Warshadaha Dhawaaqa Dheer leh

1. Warshadaha iyo waxyaabaha kale ee tacab soo saarka loo adeegsado ee leh dhawaaq dheer, qiiq ama waxyaabo kale oo dadka dhib u leh waxaa loo qoondaynayaa Lana geynayaa meelo dadka ka fog oo u gaar ah oo shuruudo u gaar ah oo xeerka khuseeya lagu xadiday.

2. Shaqooyinka dad badan kulmiya ee sawaxan iyo qaylo dheer leh ama laga qabanayo magaalada dhexdeeda waxaa loo samaynayaa saacado u gaar ah oo la qabto si loo yareeyo dhibta ay u geysan karaan degenaanshaha.

3. Shuruudaha farqadaha qodobkan ku xusan waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiye aan xeerkan ka hor imanayn

## Qodobka 21aad
## Ku Xadgudubka Qodobada Cutubkan

Haddii aan dembi kale ka dhalan, cid kasta oo ku xadgudubta qodobada Cutubkan, waxaa lagu ciqaabayaa **saddex ilaa lix bilood** oo xadhig ah ama **3,000,000 ilaa 6,000,000/=Sl.Sh.** oo ganaax ah.

# CUTUBKA 4AAD

# MADADAALADA DADWEYNAHA EE GOOBAHA

## Qodobka 22aad
## Bandhig-masraxiyeed iyo Daawsho Filim

Fagaare laguma soo bandhigi karo bandhig-masraxiyeed ama daawsho film aan fasax loo haysan si waafaqsan xeerakan.

## Qodobka 23aad
## Guddiga Ruqsadaha Bandhig-masriyeedka iyo Filimada

1. Wasiirka Dhaqanka iyo Ciyaaraha ayaa markuu la tashado Wasiirka Arrimaha Gudaha, wuxuu magacaabaya guddi fadhigeedu yahay Hargeysa taas oo ka kooban saraakiisha wasaaradaha soo socda:

    a. Dhaqanka iyo Ciyaaraha,
    b. Arrimaha Gudaha
    c. Warfaafinta
    d. Diinta iyo Awqaafta
    e. Waxbarashada.
    f. laba xubnood oo dhaqan yaqaan ah oo dadweynaha laga dhex xulo oo uu magacaabo Wasiirka Dhaqanka iyo Ciyaaruhu.

2. Guddiga fadhigooduna wuxuu noqonayaa Magaala madaxda Hargeysa

3. Guddigu wuxu joojin karaa bandhig-masraxiyeed, daawsho film sababo la xidhiidha xasilloonida guud, anshaxa, dhaqanka iyo diinta.

4. Guddigu waxay go'aankooda oo qoraal oo sababaysan u gudbinayaan dhinaca ay khuseeyso iyadoo nuqulo u kala direysa Guddiga Nabad-gelyada iyo guddoomiyeyaasha gobolada.

5. Guddigu waxa kale oo ay tilmaami kartaa in qaar mid ah filimada ama bandhig-masraxiyeedka aan loo oggolaan karin inay daawadaan cidda da'adoodu ka yar tahay 15 sanno. Xaaladahaas oo kale waa in maareeyaha bandhig-masraxiyeedka ama filim waduhu sheegaa **(Iclaamiyaa)** mamnuuciddaas isagoo ku muujinaya xayaysiisyada iyo qoraalada, waana in si adag loo hirgeliyo.

6. Guddigu awoodaha qodobkani siisey wuxu u wakiilan karaa Guddoomiyeyaasha Gobolada.

## Qodobka 24aad
## Tartanka Cayaaraha

Tartan kasta oo cayaareed oo lagu qabanayo fagaare guud waxaa ogolaanaya inta aan la qaban ka hor Duqa Magaalada lagu qabanayo.

## Qodobka 25aad
## Ilaalinta Goobaha Tartanada iyo Riwaayadaha

1. Ciidamada Ammaanka waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan goobaha lagu qabanayo tartannada cayaaraha, riwaayadaha iyo Filimada fagaaraha lagu dhigayo si loo sugo ammaanka guud ee ka qaybgalayaasha.

2. Haddii ay ka dhacaan goobahan rabshado wax u dhimaya ammanka iyo deganaanshaha guud, waxaa hay'adaha ammaanku awood u leeyihiin in ay joojiyaan ama laalaan tartanka ama daawashada.

## Qodobka 26aad
## Furashada Goobo Wax lagu Daawado

1. Ma bannaana in la furto goobo wax lagu daawado ama Xaflado dad isugu yimaado lagu qabto, haddii aan ogolaansho laga helin Duqa magaalada.

2. Si loo bixiyo ruqsadda waxaa shardi ah in guddi farsamo oo ka kooban caafimaadka iyo hay'adaha nabadgelyadu ay xaqiijiyaan in goobtu xagga caafimaadka iyo xagga ammankaba ku haboon tahay in lagu qabto hawsha loo codsaday ruqsadda ama lagu samayn karo waxa ka dhiman ee ammaanka iyo caafimaadka lagama maarmaanka u ah ruqsadda ka hor.

3. Guddiga farsmo ee ku xusan faqadda 2aad, waxaa magacaabaya Duqa magaalada, isagoo la tashanaya guddiga ruqsad bixinta ee ku xusan qodobka 24aad ee xeerkan.

4. Kharashka ku baxaya xaqiijinta habboonaanshaha goobta ee guddiga sare ku xusan waxaa bixinaya cidda ruqsadda dalbanaysa iyada oo sii marinaysa dawlada hoose.

5. Duqa magaaladu wuxuu awood u leeyahay markasta oo ay lagama maarmaan ugu muuqato in uu sameeyo baadhis uu ku xaqiijinayo in wax iska bedeleen shuruudihii ruqsadda lagu bixyey, isagoo mar kasta wixii baadhista ka soo baxa la socod-siinaya guddiga bixinta ruqsadaha ee ku xusan qod. 24aad ee xeerkan.

## Qodobka 27aad
## Carruurta ka Yar 15 jir ee Jisha Filim ama Riwaayad

1. Guddiga ruqsadaha riwaayadaha iyo filimadu wuxuu awood u leeyahay in uu diido in carruurta ka yar 15 sano ay ka shaqeeyaan ama matalaan riwaayadda ama filimka marka ay suuragal tahay in doorka ay kaga jiraan uu u keeni karo in caqiidadooda iyo anshaxoodu ku xumaado.

2. Guddigu waxay sidoo kale diidi kartaa in la dhigo filim dibadeed oo carruuri matalayso *(jilayso)* haddii uu wax u dhimayo shareecada Islaamka iyo dhaqanka wanaagsan.

3. Ruqsada waa la siinayaa ilmaha yar haddii riwaayada ama filimku ku saabsan yahay arrin waxbarasho, diineed ama dhaqanka wanaagsan ee bulshada lagu baraarujinayo.

## Qodobka 28aad
## Kormeeridda ama Ilaalinta Shaqooyinka Guud

4. Hay'adaha Ammaanku waxay ilaalinayaan, si waafaqsan xeerarka khuseeya, shaqooyinka guud ee ay tahay in rusqsad loo qaato. Waxay kaloo ilaalinayaan nidaamka hay'adaha awooda u lehi u dejiyeen saacadaha la furayo iyo saacadaha la xidhayo goobaha shaqada guud lagu qabto iyo hababka loo qabto hawshaas.

## Qodobka 29aad
## Khamaarka

Waxaa reeban dhammaan noocyada khamaarka ee ay shareecadda islaamku reebtay in la fasaxo.

## Qodobka 30aad
## Diiwaanka Hotellada iyo Guryaha la Kireeyo

1. Cid kasta oo maamusha Hotel, Guryo la kireeyo ,guri marti iyo meel kasta oo lacag lagu seexdo ama lagu dego waxaa waajib ku ah in uu dhigo diiwaan lagu qoro magacyada dadka soo gala , wakhtiga uu soo galay, goortuu baxay tilmaamtiisa guud oo dhamaystiran iyo wixii xogo ah ee ay hay'adaha Ammaanku uga baahdaan.

2. Diiwaanku waa inuu waafaqsanaadaa tilmaanta iyo shuruudaha ay hay'adaha Ammaanku u dejiyaan.

## Qodobka 31aad
## Ku Xadgudubka Qodobada Cutubkan

Haddii aan dembi kale ka dhalan, cid kasta oo ku xadgudubta qodobada Cutubkan, waxaa lagu ciqaabayaa **saddex** ilaa lix **bilood** oo xadhig ah ama 3**,000,000/= Sl.Sh** ah oo ganaax ah.

## CUTUBKA 5AAD

# ILAALINTA CARRUURTA YAR YAR

## Qodobka 32aad
## Carruurta Derbi -jiifka ah

1. Carruurta yar yar ee baylahsan ee derbiyada ku nool waxaa ilaalintooda xagga ammanku saaran tahay hay'adaha ammaanka, xanaanadoodana waxaa dammaanad qaadaya Qaranka, haddii la waayo waalidkood ama cid kale oo kafaalo qaadda.

2. Hayntooda, maxkamadayntooda iyo sida loola dhaqmayo caruurta sharciga khilaafta waxaa loo raacaya Xeerka Ciqaabta Carruurta iyo xeerarka kale ee aan ka hor imanayn xeerkan.

## Qodobka 33aad
## Edbinta Awlaada iyo Masuuliyada Waalidka

1. Waalididka hayn waaya ama dayaca ubadka uu dhalay ama masuulka ka yahay isagoo kafaalo qaadi kara, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badnayn 3, 000, 000/= SLSH, hadii dayacaasi sii socdo waxa lagu ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud.

2. Dayac waxa loola jeedaa ka warqabib la'aanta, tarbiyayn la'aanta iyo dhamaanta ka war-hayn la'aanta waxbarashada iyo caafimaadka ilmaha yar.

3. Waalidku wuxu waydiisan-karaa maxakamada degmada xadhig edbin ah ee ubadka uu dhalay ee ka wayn 15 jir, maxkamadu markay baadho kuna qanacdo sababaynta waalidka waxay xukumi kartaa xadhiga wiilkaas oo aan ka badnayn lix bilood.

## Qodobka 34aad
## Nabad-gelyada jaarka iyo masuuliyada caaqilka

1. Waxa reeban dhibaataynta jaarka iyo khal-khal galinta goobaha dadwaynuhu ka adeegto ama wadooyinka dadku maraan. Cida looga shakiyo dhibaataynta jaarka ama khalkhal galintaas, waxa lagu xukumayaa xabsi aan ka badnayn sadex bilood ama ganaax dhan 5, 000, 000/= SLSH.

2. Cidkasta oo ka qayb qaadata dagaal kasta oo safayn ah waxa lagu ciqaabayaa xabsi dhan sanad ama ganaax dhan 1, 000, 000/= SLSH si waafaqsan qodobka 444aad ee xeerka ciqaabta guud.

3. Hadii ay jirto cabsi ku saabsan aargudasho, dhinacyada ama dhinaca looga shakiyo inuu aargudanayo waxaa la haynayaa saladhiga/xabsiga ilaa inta laga hubansanayo inaan dhibaato ka imanayn.

4. Si loo hubsado inaan dhibaato ka iman, waxa damiinan kara caaqil ama oday lagu kalsoonaan karo, wixii ka yimaada waxa loo raacayaa caaqilka ama odayga damiintay.

5. Si caaqilka ama odaygu masuuliyadiisa u guto, wuxu soo jeedin karaa in la xidho cida uu damiintay mudo aan ka badnayn 24 saacadood si maxkamada awooda u leh loo horgeeyo.

## CUTUBKA 6AAD

## DIIWAAN- GELINTA URURADA IYO SHIRKADAHA

### Qodobka 35aad
### Waajibaadka Ururada iyo Shirkadaha

1. Iyadoo aan waxba loo dhimayn nidaamka diiwaangelinta ururrada iyo shirkadaha ee hadda lagu dhaqmo, Ururaddu nooc kasta ,dabeecad kasta iyo ujeeddo kasta ha-yeeshaane waa in ay hab qoraal ah Guddoomiyaha Gobolka ku war geliyaan kuna gaadh siiyaan:

    b. Dastuurkooda;
    t. Xeer- hoosaadkooda;
    j. Hawlaha bulsho ee ay qabanayaan;
    x. Liiska Aasaasayaasha ;
    Kh. Xaruntooda iyo laamahooda.

2. War gelinta ku xusan faqrada 1aad waa in ay ku qabsoontaa muddo bil gudaheed ah oo ka bilaabata maalinta ururku sharci ahaan u dhashay ama uu Gobolka yimi.

3. Xilka war-gelinta ee ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan wuxuu saaran yahay aasaasayaasha, maamulayaasha ama wakiilada ururka laga hadlayo.

4. Mar kasta oo waxa laga beddelo tilmaamaha urur ama shirkad ee ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan, waa in muddo Bil gudaheed ah lagu gaadhsiiyo Guddoomiyaha Gobolka isbeddelkaas.

5. Waxaa ka reeban oo aan laga doonayn shuruudaha sare ku xusan Ururada Dawladu u aqoonsan tahay inay leeyihiin shakhsiyad qaanuuni ah si waafaqsan xeerarka.

6. Ku dhaqmi la'aanta qodobkan (36naad) ee xeerkan, haddii falku aanu keenayn dambi intaas ka culus, waxaa lagu mutaysanayaa xadhig lix bilood ilaa sannad ah ama ganaax dhan 10,000,000 ilaa 20, 000, 000/=SL. SH ah.

**Qodobka 36aad**
**Laalista Ururada**

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

1. Guddiga nabadgeyadu waxay awood u leedahay in ay Maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh weydiisato inay laasho muddo aan ka badnayn saddex bilood hawsha ururka marka la caddeeyo in ay dhib culus u leedahay nabad-gelyada guud ama anshaxa guud, Maxkamaduna waxay sidaas ku soo saaraysaa Qaraar Sababaysan.

2. Haddii aanay baahi degdeg ahi jirin, Intaan Maxkamadda Gobolku soo saarin amarka lagu joojinayo hawsha ururka waa in Guddiga Nabadgelyadu u gudbiyaa ururka amarro uu kaga dalbanayo in ay ka waantoobaan waxyaabaha wax u dhimaya nabdgelyada iyo anshaxa guud, haddii ay ka joogsan waayaanna waxay Guddigu u gudbinaysaa Maxkamadda Gobolka.

3. Go, aanka lagaga joojinayo ururka hawshiisa wuxuu uga racfaan qaadan karaa Maxkamada Racfaanka.

## CUTUBKA 7AAD

## ILAALINTA NABAD-GELYADA

## TALLAABOOYINKA KA HOR TAGA AH

**Qodobka 37aad**
**Dammaanada Dhaqan- wanaagga iyo Xorriyadda ku Meel Gaadhka ah**

1. Haddii Guddiga Nabadgelyadu ogaato in qof hore u galay dembi nabad-gelyada lidi ku ahi laga yaabo inuu dambi kale galo ama dhaqankiisu halis ku yahay Nidaamka guud ama nabad-gelyada, waxay qoraal sababaysan qofkaas ku ogeysiin karaan in uu dhigo Maxakamadda awoodda u leh Dammaanad hantiyeed oo uu ku dammaanad qaadayo in uu si wanaagsan oo aan nabad-gelyada iyo sharciga wax u dhimayn u dhaqmayo. Sidoo kale waxaa la amri karaa in qofkaasi keeno qof dammiin ah oo lagu kalsoon yahay oo dammaanad qaada in aanu nabadgeyada wax u dhimayn, ama loo diido in uu meel uga baxo meesha uu joogo ,gurigiisa ,magaalo ilaa magaalo kale, markastana waxaa shardi ah in la hayo war bixin ku saabsan falalka lagu dabajoogo.

2. Maxkamadda Gobolku kadib marka ay dhegeysato soo jeedinta xeerilaaliyaha guud ama ku xigeenkiisa lana hordhigay go'aanka ku xusan farqadda hore, iyadoo raacaysa jidadka caddaynta ee ku cad Xeerka Habka Ciqaabta waxay qolka tashiga ku gaadhaysaa xukun ay ku ayidayso ama wax kaga bedelayso go'aanka Guddiga , iyadoo muddada gaabin karta , dheerayn karta , dabeecada iyo qaabka go'aankana wax ka bedeli karta. Sidoo kale way diidi kartaa go'aanka, markaasna wax magdhow ahi ka dhalan mayo.

3. Go'aanka maxkamadda waxaa looga racfaan qaadanayaa hab waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud.

**Qodobka 38aad**
**Qaababka Dammaanadda iyo Xorriyadda ku Meel Gaadhka ah**

1. Qaddarka lacagta dammaanadda ah ee laga dhigayo qofka la tuhmay waxaa la dhigayaa xafiisyada maaliyadda ,qaddarka uu noqonayana waxaa goynaya garsooraha awooodda u leh waxaana loo eegayaa culayska ay ku yeelan karto xaaladda dhaqaale ee eedaysanaha, markastana kama yaraan karo qaddarkaasi **5,000,000/=Sl.Sh,** kamana badnaan karo **15,000,000/=Sl.Sh**. Wayna bannaan tahay in dammaanaddu noqoto rahmaad hanti ma guurto ah ama in uu dammaanadda qaado qof lagu kalsoon yahay oo awood u leh in uu bixiyo qaddar kasta oo maxkamaddu ku waajibiso .

2. Haddii qofka dammaand kaafi ah oo lacageed waayo lana xaqiijiyo in aanu khatar sii weyn samayn karin waa banaaan tahay in qof kale damiinto lana siiyo xorriyad ku meel gaadh ah.

3. Muddada dammaanaddu kama badnaan karto sanad laga bilaabo maalintii laga dhigay dammaanadda ama la siiyey xorriyadda ku meel gaadhka ah.

4. Haddii muddadaas sanadka ah qofka la dammiintay ama lacagta laga dhigay aanu gelin wax dambi ah oo xadhig keeni Kara, waxay maxkamaddu amraysaa in loo celiyo qaddarka lacagta ah ee laga hayey ama la tirtiro rahmaaddii ma guurtada ama laga noqdo xorriyaddii ku meelgaadhka ahayd.

5. Haddiise uu dambi galo, lacagta dawlada ayaa la wareegaysa, waxaanay gelaysaa khasnadda dawladda, qofkana waxaa lagu oogayaa dacwadda ciqaabta ah ee lagu eedaynayo, si Xeerka waafaqsan.

## Qodobka 39aad
## Dhawrid La'aanta Shuruudaha Dammaanadda

Qof kasta oo diida ama fulin waaya amarada dammaanadda ee ay maxkamaddu bixiso eek u xusan qodobka hore, waxaa lagu xukumayaa, diidmada ama fulin la'aanta kaligeed, ilaa **lix bilood** xadhig ah iyo ganaax u dhigma qaddarka dammaanadda ah ee uu bixin waayey,waxaana laga qaadayaa tallaabooyin dheeraad ah oo la xidhiidhda xorriyaddiisa.

## Qodobka 40aad
## Tallaabooyinka ka Hor Tagga Dambiyada

1. Marka laga tago xaaladaha ku cad saddexda qodob ee hore ee cutubkan, marka uu dhaco dambi dhamaystirmay ama isku day ah oo lid ku ah nolosha iyo deganaanshaha qofka ama bulshada ee ay muuqato cabsi weyn oo ah in ay dhacaan falal aarsi iyo iska hor imaad laba qof ama kooxo iska soo hor jeeda ama ay iman karto xasilooni daro ku timaadda nidaamka iyo kala dambaynta ama nabad-gelyada guud , Guddiga Nabadgelyadu waxay xayiraad ku soo rogi karaan xoolalaha nool ama hantida kale ee ciidda dhibta geysatay ,waxaana lagu soo saarayaa amar sababaysan oo qoraal ah.

2. Haddii la waayo sababtii xayiraada keentay, Guddiga Nabadgelyadu waxay amri karaan in loo celiyo ciddii hantida laga qabtay, iyadoo lagu soo saarayo siidaynta amar qoraal ah oo sababaysan.

3. Labada qoraal ee ku xusan labada farqadood ee horeba waxaa si degdeg ah loo ogeysiinayaa Maxkamadda awoodda u leh.

4. Tallaabooyinka ku sheegan farqadaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan, waxaa soo saari karta maxkamadda marka ay socoto dacwad ciqaab ahi, haddii uu sidaas ka codsado xeerilaaliyaha, dhinacyada ama cid kasta oo danaynaysa.

**5.** Hadii uu dhaco fal danbiyeed ama dagaal laba dhinac ama qolo ayna suuragal tahay in aargoosi degdeg ahi dhaco, Guddiga Nabadgelyadu ee ku shaqada leh waxay amrayaan xadhiga cida looga shakiyo argoosigaa muddo cayiman oo aan ka badnayan 48 saacadoo, hadii ay jirto wali suuro galnimada aargoosi waxaa ay xadhiga ka harciyaynaya maxkamada ku shaqada leh;

## CUTUBKA 8AAD

## ILAALO GAAR AH

### Qodobka 41aad
### Ogolaanshaha Ilaalo Gaar ah

1. Iyadoon lagu xadgubayn Xeerka xakamaynta Hubka Fudud (Xeer Lr.39/2010), Shirkadaha, Wakaaladaha, xaafadaha Ururada iyo shaqsiyaadka gaarka ahi waxay yeelan karaan ilaalo gaar ah oo hubaysan, ka dib marka ay ogolaanaya qoraal ah ka helaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

2. Masuuliyadda wixii hubkaas lagu geysto ee ka baxsan is difaaca sharcigu dammaanad qaaday waxaa qaadaya cidda ruqsadda loo siiyey, wixii dambi ah ee ka dhashana waxaa loo raacayaa habka Xeerka Ciqaabta Guud.

### Qodobka 42aad
### Calaamadda Ilaalada Gaarka ah

Ilaalada gaarka ahi waa in ay leeyihiin warqad aqoonsi ah oo uu bixiyo Guddoomiyaha Gobolku.

### Qodobka 43aad
### Qaadashada Calaamadaha Ciidamada

1. Waxaa reeban inuu calaamadaha ciidamada dalka lagu yaqaano uu xidho qof aan ka tirsanayn ciidanka uu calaamadiisa xidhay.

2. Qof kasta oo falkan ku kaca waxaa la horgeynayaa maxkamadda awoodda u leh, xidhashada oo kali ah, haddii aanu dambi kale ku gelin, waxaana lagu xukumayaa **saddex bilood illaa sanad** oo xadhig ah ama **5,000,000 ilaa 10, 000, 000 /= Sl sh** oo ganaax ah.

## CUTUBKA 9AAD

## XAALADAHA DEGDEGGA AH IYO XAALADAHA DAGAALKA

### Qodobka 44aad
### Xaaladda Degdegga ah

1. Ku dhawaaqidda iyo qaadista xaaladda deg-degga ah waxaa loo raacayaa tilmaanta ku xusan qodobka 92aad ee Dastuurka Qaranka.

2. Inta lagu jiro xaaladda degdegga ah waxaa la hakin karaa sababo ammaan ama caafimaad dartood xorriyaadka dastuurku ku tilmaamay qaybta 1aad, xubinta 3aad iyadoo la ilaalinayo maslaxada caamka ah ee inta badan iyo tan qaranka.

3. Haddii aan dembi kale oo ka culusi ka dhalan, Cid kasta oo ku xadgudubta xayiraadaha la socda xeerka deg-degga ah waxaa lagu ciqaabayaa xadhig dhan ilaa **hal sano** ama ganaax dhan **10,000,000/=** SL sh ah.

### Qodobka 45aad
### Xaaladda Dagaalka

Xaalaadda dagaalka waxaa ku dhawaaqaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, waxaana ansixinaya Golayashaa Baarlamaanka, waxayna yeelanaysaa dhaqanka iyo xeerarka xaaladda degdegga ah.

## CUTUBKA 10AAD

## QODOBADA GUNAANADKA

### Qodobka 46aad
### Xeer-nidaamiye

Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay soo sari doontaa xeer-nidaamiyeyaal ama wareegtooyin aan Xeerkan ka hor imanayn oo ay ku dhaqan gelinayso xeerkan.

## Qodobka 47aad
## Laalis

Waxaa la-laalay Xeer kasta oo ka hor imanaya ama aan la socon karin Xeerkan.

## Qodobka 48aad
## Dhaqan galka xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Baarlamaanku (Wakiilada iyo Guurtida) ansixiyo M/weynuhuna saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

***Allaah Mahad leh***

*C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)*
*Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL.*

*C/risaaq Siciid Ayaanle*
*Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladda JSL*